Itaalia

MINISTERO DELL'INTERNO

euaa EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad kayar tahay da'da 18 sano jir
- aad timaaday adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah
- aad u sheegtay maamulka inaad rabto inaad dalbato magangalyo (sidoo kale loo yaqaan ilaalin caalami ah) gudaha Itaalia.

**Waad ku badqabtaa wadankan.**

SOMALI

Yurub gudaheeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur, wuxuuna xaq u leeyahay in la siiyo **taageero gaar ah**.

## YAA KU CAAWIN DOONA?



Sababtoo ah waxaad joogtaa halkan bilaa waalidiintaada, qofkale oo weyn oo loo yaqaan **masuul sharci ah** ayaa kaa caawin doona baahiyahaaga. Qofkan waa ka madax-bannaan yahay maamulka.

Haddii aadan weli la kulmin masuulka**aga sharciga** waxaad la kulmi doontaa iyaga sida ugu dhakhsaha badan.

Ilaa waqtigaas, maamulku waxay u magacaabi doonaan qof kale oo qaangaadh ah si uu kuugu taageero una matalo.

## WAA MAXAY DOORKA masuulkaaga sharciga ah?

Masuulka **aga sharciga ah** waxay kuu sharraxaysaa wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato joogitaankaaga waxayna kaa caawisaa inaad hesho jawaabaha su'aalahaaga. Shaqaale kale sidoo kale waxay kaa caawin doonaan su'aalahan.

Masuulka **aga sharciga ah** waxay u sheegtaa maamulka waxa aad u baahan tahay, waxay ku siisaa talo, waxayna kaa caawisaa qaadashada go'aannada muhiimka ah.

Waxaad had iyo jeer sharixi kartaa baahiyahaaga iyo dareenkaaga oo u sheeg masuulkaaga aragtidaada.

Haddii wax dhib ah uu kaala dhexeeyo masuulkaaga, u sheeg shaqaalaha.

Waxaad had iyo jeer weydiin kartaa shaqaalaha caawimo ama taageero haddaaad u baahato. Ha cabsan, dhibaatooyinka waa lawada xallin karaa!

**Turjumaanku** wuxuu kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqad aad fahmayso. Doorkoodu waxa weeye iney si sax u turjumaan waxa aad adiga ama dadka kale dhahdaan.

## Maxaad sameyn kartaa haddii aad rabto inaad la xidhiidho qoyskaaga?



Haddii aadan garanayn meesha qoyskaagu ku sugan yahay, ama aad xidhiidhkooda wayday, shaqaaluhu waxay kaa caawin doonaan inaad raadiso qoyskaaga.

Haddii qoys kuu joogo Yurub, u sheeg shaqaalaha (*xaruunta soo dhoweenta)* waxkasta oo aad ka ogtahay qoyskaaga.

## Iska taxadar, dadka qaarkood waxay ku galin karaan khatar



Waxaa laga yaabaa inaad ka fikirto ka bixitaanka dalkaas ama qaar ka mid ah dadka ayaa isku dayi doona inay kugu qanciyaan inaad ka cararto.
Waxay kuu noqon kartaa khatar waxayna yeelan kartaa cawaaqib xun oo ku saabsan codsigaaga magangalyo.
La hadal masuulkaaga Iyo shaqaalaha, waxaad ku sharixi kartaa xaaladda, waxayna ku siin karaan talo.

# MAXAAD HELI DOONTAA?



Waxaad heli doontaan noocyo kala duwan oo taageero iyo adeegyo ah intaad sugaysaan in maamulka baadhaan codsigiinna magangelyo. Tan waxa la dhahaa **soo dhawayn**.

Shaqaaluhu waxay kaa codsan doonaan inaad xaqiijiso inaad fahamtay macluumaadka ku jira buug-yarahan. Haddii aanad fahmayn qaybaha buug-yarahan ama haddii aad qabto wax su'aal ah, weydi masuulkaaga iyo shaqaalaha.

Waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah maalmaha soo socda.

**Waxaad heli doontaa**:



- goob aad seexataan



- agabka nadaafada gaarka ah



- cunto



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah



- dhar



Ka ilmo ahaan waxaad xaq u leedahay waxbarasho iyo inaad wax dhigato. Shaqaaluhu waxay ku sheegi doonaan hawlaha waxbarasho iyo madadaalo si ay kaaga caawiyaan inaad barato, horumariso naftaada, isla markaana saaxiibo cusub sameysato.





Iyadoo ku xidhan da'daada iyo xaaladdaada, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad shaqeyso, haddii aad rabto. Masuulkaaga iyo shaqaalaha ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah

## XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

**Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay.**

Shaqaalaha iyo masuulka ayaa kuu sheegi doonaa inaad kaqeygali doontid baaritaan caafimaad oo kalkaaliso ama dhakhtar sameeyo.





## WARGALI SHAQAALAHA IYO MASUULKAAGA HADDII:

- aad xanuusanaysantahay, dhaawacmatay ama aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdega ah
- aad tahay naafo
- lagugu xad-gudbay
- aad dareentay ama aad ka cabsanaysid qof
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- aad u baahan tahay taageero sabab kale awgeed.

Haddii aad marar badan dareento murugo, cadho, cabsi, walaac, ama ay kugu adkaato hurdadu, waxaad la hadli kartaa **dhakhtarka maanka**.

Waad aamini kartaa kalkaaliyaha, dhakhtarka, dhakhtarka maanka, shaqaalaha iyo masuulkaaga. Wax kasta oo aad sheegto lama wadaagi doono cid kale marka laga reebo masuulkaaga/ adigoon oggolaansho bixin. Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

# HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?



Meesha aad ku degi doonto inta maamulku baadhayo codsigaaga magangelyo waxay ku xidhan tahay xaaladaada.

Masuulkaaga iyo shaqaalaha waxay ku wargelin doonaan meesha ay tahay inaad degto. **Adigu waxaa laga yaabaa inaad hesho taageero iyo adeegyo kaliya marka aad degtaan goobta ay go'aamiyeen maamulku.**

**Marar aad u yar, waxaa dhici karta in carruurta lagu dejiyo xarun aysan si xor ah uga bixi karin ama ugu laaban karin sida ay doonaan. Haddii aad ku sugan tahay xaaladdan, masuulkaaga, lataliyehaaga sharci iyo shaqaaluhu way ku caawin doonaan.**

Lataliye sharci waa qof yaqaan shuruucda dalkaas, kaasoo daraasayn kara xaaladaada oo ku caawin kara.



**Meel kasta oo aad deggan tahay, waxaad xaq u leedahay inaad badqabto. Qofna looma ogola inuu:**



ku cabsi galiyo



ku caayo



ku dhibaateeyo

Ha noqoto cidday doonaan, qof aad garanayso iyo mid aanad garanaynba. Haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto shaqaalaha ama masuulkaaga, codkaaga dhiibi kartaa.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?

Waa muhiim inaad sheegto runta oo aad la shaqeyso maamulka, xitaa haddii mararka qaar ay cabsi iyo dhibaato kugu noqoto inaad sheekadaada sheegto.



Masuulkaaga iyo shaqaalaha waxay ku caawin karaan haddii ay ka warqabaan xaaladdaada.

Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka ay tahay inaad u hogaansantid.

- ✅ Raac xeerarka meesha aad degan tahay.
- ❌ Haka baxsan goobta ay maamulku kuu sheegeen inaad joogtaan.
- ✅ Raac shuruucda dalka, kuwaas oo ay shaqaaluhu iyo masuul**kaaga** ayaa kuu sharixi doona.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?

Maamuuliyiintu waxay qiimayn doonaan xaaladdaada waxayna ku wargelin doonaan adiga iyo masuulkaaga haddii ay go'aansadaan inay tallaabo qaadaan.

Haddii arrintan dhacdo, waxaad si furan ugu hadli kartaa masuulkaaga ama shaqaalaha oo waxay kuu sharixi doonaan xaaladaada.

Maamulku waxaa laga yaabaa inay go'aansadaan in:

- **laga yaabo inaad hesho taageero yar**, tusaale ahaan haddii aadan la shaqayn maamulka
- **laga yaabo inaad lumiso qayb ka mid ah taageerada aad helayso** haddii aad ku dhaqanto si rabshad leh.



Nooca taageerada aad weli heli doonto waxay ku xidhnaan doontaa xaaladdaada gaarka ah iyo baahiyahaaga.

**Adigu waxaad imika Itaalia, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+.**
**Waddamada EU+ waa:**

- 27 Dal ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.


## XEERARKA KU SAABSAN CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH IYO U SAFARKA WADDAMADA EU+



- ✔ Waa inaad joogto Itaalia oo waa inaanad u baxsan mid kamid ah waddamada EU+.
- ✔ Haddii xubno kamid ah qoyskaagu ku sugan yahay mid ka mid ah waddamadan, maamulku waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada ku saabsan isu keenista qoyska. Haka iska baxsan uun.
- ✖ Haddii aad ka cararto, waxaa jiri doona cawaaqib xun oo lagu sharraxi doono goor dambe. Tusaale ahaan, waxaad ka heli doontaa taageero yar oo soo-dhawayn ah wadanka kale.
- ✔ Xasuusnow, waa inaad ka diiwaangelisaa codsigaaga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timiday, haddii maamulku aanu kuu sheegin wax kale.
- ✔ Kaliya mid kamid ah waddaman ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo. Maamulka Itaalia ayaa kuu sheegi doona wadanka arrintan ka masuulka ah.

Waxaad ku baran doontaan habraacyadan buug-yarayaal gooni ah.

## MAXAA DHACA HADDII AAD U BAXSATID MID KA MID AH WADDAMADA EU+?




**Gudaha […itaalia]**

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**Inta aad joogtaan wadanka kale ee EU+ ah:**

- Maamulku waxay go'aansan karaan inay kugu celiyaan wadanka EU+ ee aad ka tagtay.

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli doontid noocyo kamid ah taageerada oo
- laguuma ogolaan doono inaad ka shaqaysato.

Nooca taageerada aad weli heli doonto waxay ku xidhnaan doontaa xaaladdaada gaarka ah iyo baahiyahaaga.

## YAA KU CAAWIN KARA HADDII AANAD KU QANACSANAYN GO'AANKA AY GAAREEN MAAMULKU?

Waxaad la hadli kartaa masuulkaaga oo aad weydiin kartaan su'aalahaaga.

Si wadajir ah masuulkaaga ayaa weydiisan karta caawimo lataliye sharci.



Shaqaaluhu waxay kuu sheegi doonaan ururada aan dawliga ahayn kuwaasoo sidoo kale ku siin kara macluumaad iyo caawimaad.




Waxaad la xidhiidhi kartaa Hay’adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) wakhti kasta. UNHCR waxay ilaalisaa dadka lagu qasbay inay ka tagaan dalkooda.

## QORAALADAYDA

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025